



Orientation to Ontario

ISKA ILAALI TUUGADA

WEBSEEDYADA BEEN ABUURKA AH IYO TUUGADA INTERNEEDKA

Danbiileyaasha ayaa kuobi garayn kara webseedka ama dhisi kara mid u eg mid xirfadeed. Webseedyada ayaa sheegan kara inay yihiin baraha rasmiga ah ee Dawlada Canada ama kuwa iskhaashada dawlada la shaqeeya. Kuwo kale ayaa sheegan kara inay bixiyaan hawlaha gaarka ah ee socdaalka ama damaanad qaad la xariira shaqooyin mushaar badan. Waxay sameeyaan falalkaan si ay u xadaan aqoonsiyada ayna dadku ugu khaldaan bixinta lacagtooda.

- Haddii webseed sheeganaaya inuu baxsho shaqooyinka gaarka ah oo ay siiyaan dadka doonaaya inay wadanka u soo guuraan, ka bax webseedka. Sheegashooyinkaas waa been abuur.
- Hubi ciwaanka URL ka adoo adeegsanaaya batoowsarkaaga marka aad gasho webseed. Waa inuu waafaqo ciwaanka aad qortay.
- Ha gelin xog gaar ah ilaa inuu leeyahay maahee calaamada qufulka oo ka muuqda baroowsarka amar "https://" ay ku qoran tahay biloowga ciwaanka webseedka si ay u muujiso inuu amaan yahay.

TUUGADA IIMEELKA IYO FARIIN QORAALKA

Waxaad heli kartaa iimeel u eg inuu ka yimid urur sharci ah sida nidaamyada dhaqaalaha, ganacsiyada ama wakaaladaha dawlada. Wuxuu kaa codsan karaa xog gaar ah sida taariikhda aad dhalatay, baasweerada iyo xogta kaarka daynta. Mararka qaar iimeelka ayaa kuu sheegaaya inaad booqato webseed been abuur ah.

- Ururada xalaasha ah ayaan marna kaa codsan doonin inaad xogtaada gaarka ah kusoo dirto iimeelka ama fariin qoraal.
- Haddii aad hesho iimeel noocaan ah, ha gujin wax kamid ah lifaaqyada ama ha siin xog shaqsi ah.
- Haddii aad wax shaki ah ka qabto in iimeelku ka yimid meel sax ah, xaqiiji inaad hubiso aqoonsiga soo diraha. Iimeellada tuugada ayaa badanaa lagasoo diraa ciwaan gaar ah ama ciwaanka webseedka aan xadidnayn (Yahoo, Hotmail ama Gmail) kamana yimaadaan ciwaanka iimeelka Dawlada Canada "gc.ca" ama "canada.ca".
- Iska tuur oo iska indho tir fariimaha ka yimaada dadka aadan aqoon oo cusbooneysiis nidaamkaaga la dagaalanka tuugada ee dhammaan qalabkaaga.
- Ha u jawabain fariimaha tuugada, xataa haddii aad iska xirayso, oo marna ha furin ama raacin lifaaqyo ama linkiyo laguusoo diray.

TUUGADA TALEEFANKA

Danbileeyaasha ayaa dadka taleefanka ka khiyaani kara ayagoo iska dhigaaya inay ka socdaan Waaxda Soo galoottiga, Qaxootiga iyo Muwaadinimada ee Canada (IRCC), Wakaalada Dakhliga ee Canada (CRA) ama booliiska. Saraakiisha IRCC, CRA ama booliiska ayaan marna kusoo wici doonin si ay kaaga dalbadaan inaad lacag soo shubto, lacag u dirto ama siiyaan adeegyo gaar ah dadka doonaaya inay soo guuraan. Mararka qaar waxay kaala soo xariiri karaan taleefanka si ay xog dheeri ah kaaga siiyaan sii wadista shaqada codsi, ama kaaga dalbadaan dukumiintyo dheeri ah.

1-855-626-0002
<https://orientationontario.ca>



Funded by / Financé par

doonaaya inay soo guuraan. Mararka qaar waxay kaala soo xariiri karaan taleefanka si ay xog dheeri ah kaaga siiyaan sii wadista shaqada codsi, ama kaaga dalbadaan dukumiintiyo dheeri ah.

- Dadka ayaa u adeegsan khiyaannada taleefanka si ay u xadaan lacagtaada ama aqoonsigaaga.
- Aad uga feejignoow tuugada taleefanka ee kaa codsanaysa xogta sida kaararka daynta, lambarada koontada baanka ama xog kasta oo kale oo la xariirta bixinta lacagta.
- Haddii lambar aad ka shakiday kusoo waco, kujar isla markaba kadibna la xariir booliiska deegaanka si aad ugu sheegto. Sidoo kale waxaad la xariiri kartaa Xarunta La Dagaalanka Khiyaannada ee Canada.

WAXYAABAH AY TAHAY INAAD XASUUSATO

Dawlada Canada ama booliiska ayaan marna adeegsan doonin luuqad qalafsan ama hanjabaad leh.

Dawlada Canada ayaan marna kaa dalban doonin nooc lacag ah ayadoo kaasoo wacaysa taleefan, iimeel ama fariin qoraal.

CRA ayaan marna kuusoo diri doonin iimeel ama fariin qoraal ay kaaga codsanayaan lacag ama qarash aad ku bixinayso kaararka daynta ee horey lacagta loogu shubto, kaararka hadiyada ama lacagaha oonlaynka lagu diro ee Interac.

IRCC ayaan marna kaasoo wacayn taleefanka, iimeel ama fariin qoraal kuusoo dirayn ayadoo kaa codsanaysa xogtaada gaarka ah. Mararka qaar ayay kulasoo xariiri karaan si ay kaaga codsadaan dukumiinti dheeri ah si loosii wado shaqada codsi.

Dawlada Canada fiiso kumasoo dirto iimeelka.

XARUNTA LA DAGAALANKA TUUGADA EE CANADA

Xarunta La dagaalanka Tuugada ee Canada (CAFC) waa wakaalada dhexe ee Canada ee aruurisa xogta iyo sirta danbiyada ee arimahaas la xariirta sida khiyaannada balaaran ee suuq aynta, khiyaanada lacagta hormariska ah, khiyaannada interneedka iyo cabashooyinka tuugada aqoonsiga. Si aad u barato sida aad u difaacayso naftaada booqo antifraudcentre.ca

MA OTAHAY?

Haddii lagu khiyaanay ama ay ku beegsadeen tuugo, waa inaad markasta soo sheeg. La xariir Xarunta La Dagaalanka Tuugada ee Canada (1-888-495-8501) ama Laanta Tartanka (1-800-348-5358) si aad u hesho talo ku aadan meesha aad warbixinta gaynayso.

ILAHA XOGTA:

Canadian Anti-Fraud Centre:
antifraudcentre.ca

Competition Bureau:
competitionbureau.gc.ca

Government of Canada:
canada.ca/en/immigration-refugees-citizenship/services/protect-fraud/internet-email-telephone.html

The Little Black Book of Scams:
competitionbureau.gc.ca/eic/site/cb-bc.nsf/eng/04333.html#sec10

, \$ " 7 1 8 8 1 4 * 3 % 6 6 2 * 4 % 6 6

Soo sheeg khiyaannada, tuugada iyo danbiyada kale waaxda booliiska ee deegaankaaga.

U dir iimeellada aadan doonayn ama aad ka shakido Xarunta Warbixinta Khiyaannada spam@fightspam.gc.ca

